

Xeerka – Sharci, ee 2 Disember 1961, lamba. 6.

Go'aannada xagga canshuuraha, eek u jahaysan uruurinta gargaarka loogu talagalay dadweynaha ay ku habsadeen musiiboo yinka qaran.

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Markuu arkay Qod. 63aad, ee Dastuurka;

Markuu garwaaqsdhay baahida loo qabo in la helo sanduuq (lacago) lagama maarmaanka u ah sí loogu gargaaro dadweynaha dhibaateysan daadadkii dhowaan ku dhuftay awgood;

Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Kaddib soojeedinta Wasiirka lacagta (Maaliyadda);

WUXUU XEERAYAA

Dejinta canshuur-dheeraad ah oo la saarayo bilyeeti yada (waraaqaha) lagu gelayo filimada lagu dhigayo meelaha dadweynaha u furan iyo wixii madadaalooyin ah.

Dejinta canshuurta dheeraadka oo la saarayo bilyeeti yada lagu gelaayo meelaha dadweynaha u furan ee madadaalooyinka iyo xaaxaysiga.

Qod. 1

Qiimaha bilyeeti kasta oo lagu gelayo golayaasha madadaalada, shinoomooyinka, garoomada ciyaaraha ispoortiga, qoob-ka-ciyaarka iyo meel kasta oo dadweynaha u furan oo lagu xaaraysto, oo ay canshuur ku waajibto, waxaa laga rabaa, oo ka dheeraad ah isla canshuurta caadiga, canshuur lagu taageerayo Guddiga khaaska, ee gurmagka iyo did-u-dhiska, oo dhan 20% oo ku saleysan qiimaha bilyeeti kasta, oo ay ku jirto canshuurta qaqa ah.

Lacagta laga rabo bilyeeti kasta, ee dheeraadka waa in lagu sí cad loogu muujiyo jadwalka (tabeellaha) oo sharciyan ay tahay in dadweynaha loogu dhejiyo albaabka goobta shaqo.

Sanduuqaas gargaarka waxaa kale oo u waajibaya isku celceliska lagama maarmaanka ah, sí loo gooyo lacagta guud, ee qiimaha dadweynaha looga iibinayo belyeeti kasta illika lagu soo gelaayo.

Siyaadada la sarayo qiimaha dadweynaha looga iibinayo tubaakada laga shaqeyey.

Qod. 2

Waxaa la góaamiyey qiime kordhin 20% ah oo lagu saaidinayo qiimaha qiimaha dadweynaha looga iibiyo tubaakada laga shaqeyey oo nooc iyo tayo kasta ha lahaato, meel kastana ha ka timaadee, taas oo ay ku jirto tubaakada la ruugo.

Qod. 3

Wasiirka Maaliyadda ayaa ku ku dhaqaaqaya in uu xeer kiisa ku ggooyo qiimaha cusub dadweynaha looga iibinayo noocyada tubaako uu ku xusan Qod. hore, ayada oo ay wehliyaan isu-celcelinta loo baahan yahay, sí loo gooyo qimooyinkaas cusub.

Qod. 4

Ribaxa ay xaqa u leeyihiiin dib-u-iibiyeyaasha wayaaha ixtikaarta (maanaboolyada

ku jira) waxa la gooyey in uu noqdo 6% , wuxuuna ku saleysan yahay qiimaha noocyada tubaako oo la qaaday, oo ay ku jirto siyaadada qaddarka lagu saaray xeerkan.

Qod. 5
Axkaamta leh Dabeeecad Guud iyo Ciqaab

Qof kasta oo ay waajib ku tahay dabbaqidda iyo qaadista canshuurta dheeraadka oo lagu yeelanayo sida uu qabo xeerkan, oo ka baaqsada waajibka ayadaas ka imaanaya, waxa uu muteysanayaa ganaax ugu yaraan 60 jeer ilaa ugu badnaan 100 jeer lacagta (canshuurta) uu la fakaday, oo lagu daray ciqaabaha kale oo u degsan dembiga la galay.

Qod. 6

Lacagaha la qaado, ee ku aaddan canshuurta dheeraadka iyo siyaadada ku xusan xeerkan waa in gooni loo xisaabiyo, ayna shubaan xafiisyada ka dhisan Bangiga Ummadda (qaranka) Soomaaliyeed oo ku qoran Guddiga qaabilsan dadka daadadku qaadeen.

Qod. 7

Xeerkan waxa uu dhaqangelaya taariikhda isla asagaas lagu nashriyo Faafinta Rasmiga, ee Jamhuuriyadda.

Xeerka asaga ah waxaa loo gudbinayaa Golaha shacbiga, 'si loogu rogo (beddeelo) sharci.

Muqdisho, maanta oo taariikhdu tahay 2^{da} Disember 1961.

Aden Cabdulle Cusmaan

Wasiirka Kowaad

Cabdirashiid Cali Sharmarke

Wasiirka Lacagta (Maaliyadda)

Cabdulqadir Maxamed Aden

Waa arkay, waana Diiwaangeliyey –

Diiw. lamba, 9, xaashi lr. 165.

Muqdisho, 2 disember 1961.

Ku-xigeenka Hantidhowraha: **Cali Axmed Cumar**